



## Qiimeynta Iskuulka xanaanada Oregon: Kucaawinta macalimiinta in ay si fiican u taageeraan ilmahaaga dhigta iskuulka xanaanada

Waxaan rajeyneynaa maalinta ugu horeysa ee ardeygaaga Xannaanada Caruurta uu bilaabay inaan soo dhaweyno ee Tallaadada, bisha Sebtember 5teeda. Sanadkani, dhammaan caruurta soo galeysa Xannaanada Caruurta gobolka Oregon waxa ay ka qeybqaadan doonaan Qiimeynta Xannaanada Caruurta Oregon. Waxaa kula soo xiriiri doona iskuulkaaga sidii uu ballan kuugu sameyn lahaa adiga iyo ilmahaaga aad kula kulanto macalinkaaga, ka dibna aad ka qeybqaato qiimeynta Bisha Ogost, 30deeda, 31keeda ama Sebtember 1deeda.

Qiimeyntani waxay caawineysaa macalinka ilmaahaga sidii u fahmi lahaa baahida waxbarasho ee ilmaahaaga iyo sida ugu wanaagsan ee uu ugu qorsheyn lahaa inuu daboolo baahidaasi. Ilmahaagu wuxuu ka qeybqaadan hawlaha qiimeynta oo diirada lagu saarayo heerkiisa waxbarasho ee bilowga akhriska/qoraalka iyo xiradihiisa xisaabta, iyo dhismaha shucuurtiisa bulsho.

### Halkan waxaa kuqoran qaar kamid ah su'aalaha inta baddan laweydiiyo ee kusaabsan Qiimeynta Iskuulka xanaanada Oregon:

**In intee la eg ayay qaadanaysaa qiimeynta?** Waxay kuqaadanaysaa caruurta badankooda kudhowaadkii 15 daqiiqo si loo dhammeeyo qiimeynta uu sameeyo macalinka. Kulankaan waa fursad loogu talagalay adiga iyo ilmahaaga si aad u barataan macalinka ugana hadashaan waxa kusaabsan iskuulka xanaanada, looguna caawiyo ilmahaaga dhigta iskuulka xanaanada in uu noqdo mid aad isugu kalsoon oona si fiican ugu bilaabo iskuulka. Kadib marka uu ilmahaagu kaqayb galo iskuulka xanaanada dhowr todobaad kadib, macalinka wuxuu qiimeyn kusameynayaa xiriirka uu ilmahaagu layeesho caruurta kale iyo xirfado kale oo bulshad.

**Malaga yaabaa ilmahaaga in uu kudhaco imtixaanka?** Maya. Ardayda kuma dhici karaan imtixaanka. Qiimeyntaan waxay bixinaysaa sawir dhakhso ah oo kusaabsan waxa uu ilmahaagu kagaranayo gelida iskuulka xanaanada.

**Sideen ugu caawin karaa ilmahaaga in uu u diyaar garoobo iskuulka xanaanada?** Waalid ahaan, adiga waxaad tahay macalinka koowaad – ee uguna muhiimsan – ilmahaaga. Waxaad bilaabi kartaa abuurida jecel loo qabo waxbarashada waxaadna dhisi kartaa xirfado muhiim ah oo hore adiga oo sidaasna kusameeya tooska hawlo qosol leh iyo ciyaaro. Tusaalooyinka iyo linkiyada loogu talagalay xogag dheeraad ah ayaa laga helayaa hoos.

**Miiyaan dooran karaa in ilmahegya imtixaanka aan ka dhaafno?** Waalidiintu waa dooran karaan in ay ardeygooda ka dhaafaan qiimeynta xannaanada isaga oo cuskanaya dhinaca diintiisa awgeed ama laxaad la'aantiisa. Waalidiintu waxa ay nuqul ka heli karaan foomka lagaga dhaafayo xafiiska iskuulka ama on-line ee halkan <http://www.pps.net/Page/1651>.

**Haddii aad qabtid su'aalooyin kusaabsan jadwal sameysashada loo sameysto qiimeynta, fadlan wac iskuulkaaga.**

### Hawlaha iyo Ciyaaraha Kor loogu qaadayo Guusha laga gaaro Iskuulka

**U akhri lana hadal ilmahaaga.** In si wadajir ah loo hadlo waxna loo akhriyo waxay dhiseysaa ereyo. Maktabadaada dadweynaha waxay bixisaa buuggaag iyo waqtiyo sheeko. Kala hadal ilmahaaga waxa kusaabsan bilaabida iskuulka xanaanada iyo la kulanka saaxiibo cusub. Weydii haddii uu ilmahaagu qabo su'aalooyin kusaabsan iskuulka kadibna si wadajir ah ula wadaag macalinka.

**Samee hawlaha joogtada ah ee iskuulka kahor inta uusan iskuulku bilaaban.** Halwaha joogtada ah waxay kayareynayaan welwelka ilmaha iyo waalidiinta, iyo sidoo kale kucaawinayaan kaqayb qaadasho wanaagsan oo iskuulka ah. Kaqayb qaadashada wanaagsan ee laga qayb qaato iskuulka xanaanada waxay horseedaysaa guusha iskuulka! Samee waqti seexasho xilli hore ah iyo waqti-soo kicid, iyo macasalaamayn kalsooni leh. Si loogu caawiyo xusuusashada hawlaha joogtada ah, si wada jir ah u sameeya liis warbixineed subixii ah oo leh sawiro hawl kasta ah.

**U isticmaal xisaabta hawlaha maalin laha ah iyo kuwa joogtada ah.** Kucaawinta kala saarida iyo isku aadinta iskaal-sooyinka marka ladhaqayo, xisaabinta karootada waqtiga wax lacunayo, iyo magacaabida qaababka ay leeyihiin waxyaabaha qolka kujira waa qaabab tusaalooyin fudud oo lagu baro fikradaha xisaabta.

Wixii kusaabsan macluumaad dheeri ah ee khuseeya Qiimeynta Iskuulka xanaanada Oregon iyo xogaga tallooyinka diyaar garowga, booq boggaan internetka: <http://oregonearlylearning.com/kindergarten-assessment/ka-for-parents/>